



**PORLAND**  
**Public Schools**



***Ka soo qaybgal Kulanka Macluumaadka ee Naqshadaynta Casriyeynta  
Cleveland***

***Khamiis, May 1 gudaha Kafateeriyyada CHS***

**Laba shir: 2:30 pm ilaa 4:30 pm iyo 5:30 pm ilaa 6:45 pm**

Qoysaska Dugsiga Sare Cleveland & Qoysaska Kooxda ee Qaaliga ah,

Nagu soo biir Khamiista, May 1, Kulanka Macluumaadka Naqshadaynta Bulshada ee kafateeriyyada CHS kaas oo soo bandhigi doona naqshadihi ugu dambeeyay iyo cusboonaysiinta mashruuca ee Mashruuca Casriyeynta Cleveland. Waxaa jiri doona laba kulan oo dhacdadan ah, mid laga bilaabo 2:30 pm ilaa 4:30 pm iyo mid kale 5:30 pm ilaa 6:45 pm.

Hakin ku meel gaar ah ka dib, Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay dib u bilaabeen qorshaynta casriyaynta Dugsiyada Sare Cleveland, Jefferson, iyo Ida B. Wells—iyaga oo qaadaya hab kharash-ku-ool ah oo lagu gaarsiinayo jawi waxbarasho tayo sare leh ee ardayda iyo shaqaalahaa.

***Ka soo qaybgal wakhti kasta inta lagu guda jiro labada kulan ee May 1***

Kooxda naqshadaynta Cleveland waxay si dadaal leh uga shaqeeyeen si ay u yareeyaan kharashaadka iyagoo ilaalinaya isla qaababka naqshadaynta ee ay mudnaanta siiyeen bulshada Cleveland iyada oo loo marayo shaqo ka qaybgal dadweyne oo ballaaran. PPS waxaa ka go'an in ay ilaalso tayada barnaamijka ee markii hore la rabey si loo daboolo baahiyaha ardayda, shaqaalahaa iyo bulshada.

Kulankaan macluumaadka waa fursadaada inaad la kulanto kooxda naqshadeynta oo aad wax ka barato Casriyeynta Cleveland. Dhacdadan ayaa lagu qaban doonaa kafateeriyyada CHS waxaana la bixin doonaa cunto fudud. Wuxaan rajeyneynaa inaan ku aragno halkaas!

**Dugsiga sare Cleveland waxaa ku jiri doona:**

- Dhammaan tas-hiilaadka cusub oo leh goobo waxbarasho oo la casriyeeyay, oo ay ku jiraan fasallada Waxbarashada Farsamada Xirfadda.
- Goobta jimicsiga oo weyn, Goobta jimicsiga auxiliary-ka oo lagu daray, iyo goobo farshaxan oo casri ah.

- Barxad bannaanka ah iyo meelaha la isugu yimaado ee ardayda iyo shaqaalaha.
- Grandstands-ka la balaariyay iyo garoon cusub oo ku yaal Stadium-ka Cleveland.

### **Jadwalka Casriyeynta Cleveland**

Qorshaynta iyo shaqada naqshadaynta Ida B. Wells & Cleveland waxa la maalgeliyay iyada oo loo marayo Bond-ka Dugsiga 2020. Lacagaha dhismaha ee Cleveland iyo Ida B. Wells waxay u baahan yihiin inay ka yimaaddaan Bond-ka Horumarinta Dugsiga ee ku beegan codbixinta doorashada May 20-keeda, 2025.

Jadwal la cusboonaysiiyay oo dhismaha dugsiga sare Cleveland ayaa la samayn doonaa iyadoo ku xiran natijada doorashada May 20-keeda. Inta lagu jiro muddada saddexda sano ah ee dhismaha, ardayda Cleveland iyo shaqaalaha waxay u wareegi doonaan Xarunta Marshall oo ku yaal 92nd & Powell.

### **Si joogto ah u booqo websaydka si aad macluumaad dheeraad ah u hesho**

Websaydka casriyeynta Cleveland, [www.pps.net/ClevelandBond](http://www.pps.net/ClevelandBond), waxay haysaa horumarkii ugu dambeeyay ee mashruucii, fursadaha ka-qaybgal ee soo socda, iyo agabkii hore ee shirarka si loo eego.

Waad ku mahadsan tahay inaad nagu caawisay abuurista Dugsiga Sare Cleveland oo la casriyeeyay.

Kooxda Mashruuca Casriyeynta Cleveland